XAASHIDA AY KU QORAN TAHAY XOGAHA MUHIIMKA AH

# Fahmida Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo

Volunteers of America
MINNESOTA AND WISCONSIN

## Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo: Hab Shakhsi ahaaneed

Dadku waxa ay maraan go'aamo ku salaysan is dhexgalka kakan ee rabitaannada, baahiyaha, taariikhda shakhsi ahaaneed, xidhiidhada, waxbarashada, dhaqanka, caqiidada, iyo khibradaha gaarka ah. Marka shaqsiyaadku dareemaan inay maqleen oo ay fahmeen taageerayaashooda iyo cida adeegyada siiso, jawi iskaashi ayaa soo baxaya. Nuxurkani wuxuu koobayaa go'aan samaynta la taageeray (SDM).



### Waa maxay Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo?

Marka la jooga gudaha Minnesota, SDM waxaa si sharci ah loogu qeexaa inay tahay "caawinta hal ama dhowr qof oo shakhsi ah si ay u fahmaan dabeecadda iyo cawaaqibka ka iman kara go'aamada shakhsi ahaaneed iyo kuwa maaliyadeed, taas oo awood u siinaysa qofka inuu sameeyo oo uu gudbiyo go'aamo waafaqsan rabitaankooda."

### Mabaadi'da Muhiimka ah ee Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo

SDM waxay ku qotontaa caqiidada aasaasiga ah ee ah in qof kastaa uu xaq u leeyahay in uu ku noolaado nolol buuxda, oo uu sameeyo aayo ka tashi, oo uu helo taageerada uu qofka hago. Waxay ujeedadeedu tahay inay isku dheelitirto waxa muhiimka u ah qofka (tusaale ahaan, hadalka shakhsi ahaaneed, qiyamka dhaqameed, cilaaqaadka) iyo waxa muhiimka u ah iyaga (caafimaadka iyo badqabka). SDM waxa ay ilaalisaa xaqa ay shakhsiyaadka u leeyihiin in ay go'aan gaadhaan, kobcinta xidhiidh adag oo ay la yeeshaan taageereyaasha oo u horseeda natiijooyin wanaagsan sida shaqada, is-dhexgalka bulshada, iyo ku qanacsanaanta nolosha.

## Maxay muhiim u tahay?

Sharci ahaan, isku dayga SDM iyo kuwa kale ee leh xaddidaada yar waa qasab ka hor inta aan la raadin mas'uuliyad ka noqoshada iyo/ama kormeerka qof ay maxkamada u amartay. Marka laga reebo waajibaadka sharciga, qaadashada SDM waxay ilaalinaysaa mabaadi'da aayo-ka-tashiga iyadoo la hubinayo in baahida qofka la daboolo. SDM waxay xushmaynaysaa xaqa ay shakhsiyaadku u leeyihiin inay kula noolaadaan noloshooda ugu wanagsan hay'ada iyo qolada taageerada xaddidaada ugu yar.

# Fahmida Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo

XAASHIDA AY KU QORAN TAHAY XOGAHA MUHIIMKA AH

## Sida loo fuliyo Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo

SDM waa mid dabacsan oo kala duwan, iyada oo aan lahayn liis hubineed ama nidaam adag. Waxay ku lug yeelan kartaa heshiis qoraal ah, is-dhexgal maalinle ah, ama wadahadal marmar ah oo lala yeesho qof la aamini karo inta lagu jiro waqtiyada go'aan qaadashada. Nidaamku wuxuu ku bilaabmaa iyada oo la aqoonsanayo arrinta, fahamka qofka awoodiisa iyo caqabadaha, iyo ka qaybgalka wadahadal furan. Tan waxa ku jira sahaminta aragtiyaha, dookhyada, iyo qorshayaasha, ka hadalka khataraha iyo faa'iidooyinka, iyo helitaanka macluumaadka lagama maarmaanka ah iyada oo loo marayo Shaacinta Macluumaadka haddii loo baahdo. Hadafka waa in lagu caawiyo qofka inuu gaaro go'aamo xog ogaal ah, oo lagu daro ilaalinta lagama maarmaanka ah, shabaqyada badqabka, iyo qorshooyinka kaydinta.

## Tixgelinta Hanaanada Waxtarka leh

Markaad qof ka caawinayso go'aan gaarista, habka loo wajahayo waa muhiim. Arrimaha la tixgelinayo waxaa ka mid ah:

### Waqtiga

Tixgeli waxa sababay jirrada, wakhtiga maalinta, iyo arrimaha dibadda ee saameeya nolosha qofka

### Xogta Ku haboon

Qiimee macluumaadka ku habboon heerka dooda oo fahan arrimaha dhaqanka ee saameeya caqiidada iyo go'aamada

### Wada hadalka

Isticmaal luqad cad, sawiro, iyo luqadda la doorbido; kalsooni dhis oo waqti u ogolow in la tixgeliyo. Mar kale isku day haddii loo baahdo

### Ka qayqaadashada Qof walba

Go'aanso cidda lagu darayo iyadoo ku saleysan kalsoonida, tixgelinta dhaqanka, raaxada, badbaadada, iyo baahiyaha tarjumaada

Go'aan qaadashada qofka laga caawiyo waa dadaal dhamaystiran, oo koobaya dhammaan ficilada, ha ahaadeen kuwa weyn ama kuwa yar, mid rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn, kaas oo gacan ka geysta horumarinta aayo-ka-tashiga shakhsiga iyo buuxinta baahidooda.

## Wixii Kaalmo Dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah ama la tashi ah, fadlan la xiriir ilaha VOA ee soo socda:

**Center for Excellence oo la Iskaga caawiyo Go'aan Gaarida**

**Khadka Laga helo Xogaha Daryeelka Ilmaha:** 952-945-4174 *(khadka lacag la'aanta ah 844-333-1748)*

**Iimayl:** cesdm@voamn.org

**Websaydka:** www.voamnwi.org/cesdm

*Agabyadan waxaa lagu sameeyay taageero laga helay Deeqaha Minnesota ee Da'dka Da' kasta leh ay heli karaan. Turjumaada agabyadan waxaa lagu taageeray maalgelin ka timid Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota, Qeybta Adeegyada Gabowga iyo Naafada.*